

Hagaha guryeynta qaxootiga

Scotland

Masuuliyadaha kirada iyo sida la isaga bixiyo kharashka guryeynta



scottish
refugee
council

Rent and housing cost - Somali

Warqadda 7– Abriil 2011

Haddaad hesho fasax ku joog, adaa iska bixin doona kirada gurigaaga.

Warqaddani waa hagaha kooban ee kaalmada lagu heli karo haddii

dakhligaagu hooseeyo ama aanad shaqayn. Sidoo kale wuxuu bixiyaa macluumaad ah sidaad caawimo ugu heli karto iska bixinta kiradaada.



Iska bixinta kiradu waa masuuliyaddaada kiro ku jire ahaan. Haddaanad iska bixin kiradaada, waxay keeni kartaa in guriga lagaa saaro ood halkaa gurigaaga ku waydo.

Maadaama ay arrimahani kakan yihiin, waa inaad raadisaa talo; macluumaadka ku yaal dhammaadka warqaddan ayaa kuu sheegaya sida tan loo sameeyo.

Waxaan ka kiraystay guriga gole ama ururka guryeynta. Waa maxay caawimada aan heli karaa si aan isaga bixiyo kirada?

Haddii dakhligaagu hooseeyo ama aad hesho faa'idooyinka daryeelka, waxa dhici karta inaad ku andacooto Faa'idada Guryeynta.

Sidee baan taas u sameeyaa?

Isla markaad u malayso inaad u baahan tahay caawimo, garaac ama booqo xafiiska faa'idada guryeynta ee Golaha deegaankaaga. Shaqaalaha halkaas ayaa ku siin doona foom andacood si aad u buuxiso dibna ugu celiso iyaga.

Haddaad u baahato caawimo buuxinta foomka, kala xidhiidh kooxda guryeynta Scottish Refugee Council **0800 085 6087** ama money advice agency. Ka eeg dhammaadka warqaddan tafaasiisha lagala xidhiidhayo.

Markaad u dhiibayso foomka buuxa guddida, waxaad u baahan doontaa inaad ka bixiso caddayn dhammaan macluumaadka ku qoran – aqoonsiga, dakhliga, kirada, iwm.

Isticmaal liiska warbixinta caddaynaysa macluumaadka loo baahan yahay si loo taageero andacoodka ku yaal websaayd Shelter Scotland:

[http://scotland.shelter.org.uk/data/assets/pdf_file/0014/23081/Checklist - items to support a benefit claim.pdf](http://scotland.shelter.org.uk/data/assets/pdf_file/0014/23081/Checklist_-_items_to_support_a_benefit_claim.pdf)

Markaad dhiibto foomka, hubso inaad hesho risiidhkiisa iyo risiidhka dokument kasta ood wareejisay.

Maxaa xigi?

Goluhu wuxuu go'aansan doonaa bal haddii aad u qalanto Faa'idada Guryeynta, hadday sidaa tahay, waa ilaa intee. Waxay ku waydiin karaan macluumaad dheeraada si ay uga caawiso go'aanka ay gaadhayaan.

Haddaanad helin go'aanka kadib 14 cisho, la xidhiidh xafiiska faa'idada guryeynta si aad u codsato lacag bixin hadda ah si aanad dib uga dhicin bixinta kiradaada.

Golaha ayaa warqad kuu soo diri si ay kuugu sheegaan go'aanka. Hadday awoodaan inay ku caawiyaan, markaas guddidu waxay bilaabi doonaan u siinta faa'idada guryeynta si toosa hantiilahaaga. Haddaad u malaynayso in xaddiga la go'aamiyey khalad yahay, rafcaan ayaad ka qaadan kartaa. Waxaad ka heli kartaa talo mid ka mida wakaaladaha ku qoran dhammaadka warqaddan.

Waxaan ka kiraystay gurigayga hantiile gaara. Waa maxay caawimada aan heli karo si aan kirada isaga bixiyo?

Haddaad dakhli hoosayso ama aanad shaqayn, waxa dhici karta inaad ku andacooto local housing allowance. Caddaynta xaq u yeelashadu way kakan tahay, waxayna haddaba ay tahay inaad kala tashato golahaaga deegaanka waxa ay ku bixin doonaan kiraynta gaarka ah. Sidoo kale waxaad ka heli kartaa talo mid kasta oo ka mida lala xidhiidheyaasha ku qoran dhammaadka warqaddan.

Sideen u heli karaa caawimo?

Haddaad ka fikirayso kiraysasho gaara, waa inaad ugu horayn eegtaa websaaydka Guddida deegaanka si aad u qiyaasto intaad faa'ido mutasatay. Isla marka aad u malayso inaad u baahan tahay caawimo, garaac ama booqo xafiiska faa'idada guryeynta ee guddida deegaankaaga. Shaqaalaha halkaas ayaa ku siin doona foom si aad u buuxiso ood ugu celiso iyaga. Waa inaad sidoo kale codsataa foom si aad ugu andacooto Faa'idada Cashuurta Guddida markaad halkaas joogto. Haddaad u baahan tahay caawimo si aad u buuxiso foomka, kala xidhiidh kooxda guryeynta ee jooga Scottish Refugee Council **0800 085 6087**

Sideen caawimo ugu heli karaa bixinta kiradayda haddaan arday ahay?

Ardayda wakhtiga buuxa badankoodu xaq uma laha inay ku andacoodaan faa'idada guryeynta. Si kastaba, haddaad tahay arday wakhtiga badhkii ama aad tahay kooxaha laga cafiyey, markaas waxaad awoodi kartaa inaad hesho caawimada kiradaada. Tusaale ahaan, haddaad tahay waalid kalidaa jira ama naafo, waxaad awoodi kartaa helista faa'idada guryeynta.

Ka raadi wax badan oo ku saabsan shuruudda mutaysiga helidda faa'idada guryeynta haddaad tahay arday websaaydka Waaxda Shaqada iyo Tarmiiska:

<http://www.dwp.gov.uk/publications/specialist-guides/technical-guidance/rr2-a-guide-to-housing-benefit/students/>

Waxaad heli kartaa talo ku saabsan helidda housing benefit haddaad tahay arday ka socda Guddida deegaanka, Shelter Scotland ama Citizen's Advice Bureau ee deegaankaaga.

Haddaanad mutaysan faa'idada guryeynta, waa inaad kala xidhiidhaa adeegyadaada ardaydnimo kuuliyaddaada ama jaamacaddaada talo dheeraad ah.

Maxaa xiga?

Guddidu waxay go'aansan doonaan bal haddii aad u qalanto local housing allowance iyo, hadday sidaa tahay, waa ilaa intee. Waxay ku waydiin karaan macluumaad dheeraada si ay uga caawiso go'aanka.

Haddaanad helin go'aan kadib 14 cisho, la xidhiidh xafiiska faa'idada guryeynta si aad u codsato lacag bixin hadda ah si aanad dib uga dhicin bixinta kiradaada.

Guddida ayaa warqad kuu soo diri si ay kuugu sheegaan go'aanka. Hadday awoodaan inay ku kaalmeeyaan, markaas Guddidu waxay bilaabi inay ku siiyaan xaddigii ay tilmaameen.

Haddii xaddiga Guddidu sheegtay ayna wada bixinayn kharashka kiradaada, waxaad dalban kartaa habka bixinta guryeynta intaad doonto si aad u daboosho hoos u dhaca. Waxaad heli kartaa talo ah sida loo sameeyo andaco ka socota mid kasta oo ka mida adeegyada ku qoran dhammaadka warqaddan.

Waan la daahay bixintii kiradayda. Maxaan samayn karaa?

Dib ula dhaca bixinta kiradaada waxa la dhahaa "kiro la dib dhac". Haddaad kirada la daahday, hantiilahaagu wuxuu kaa saari karaa gurigaaga, markaas waa inaad raadisaa caawimo sida u dhakhsaha badan.

Waxani waa waxa ay tahay inaad samayso:

- La hadalka hantiilahaaga
Waxa suurogal noqon kara inuu dhaco qabanqaabo kaa caawin doonta inaad gaadho lacag bixinahaagii habsanka ahaa. Haddaad ka kiraysato guddi ama ururka guryeynta, waa inay hubiyaan bal inaad mutaysatay wax faa'ido ah si ay kaaga caawiso bixinta kiradaada. Hantiileyaasha qaar waxay shaqaalaysiiyaan saraakiisha xaquuqda daryeelka kuwaas oo ku caawin kara.
Haddaad ka kiraysatay hantiile gaara, waa inaad ka hubisaa faa'idada guryeynta xafiiska guddida: waxa dhici karta inaad mutaysatay gunnada guryeynta deegaanka.
- Hel caawimo
La xidhiidh Citizen's Advie Centre, waa xarun talo oo deegaanka ah, ama Scottish Refugee Council. Dib ha u dhicin!

Halkeen ka heli karaa macluumaad dheeraada?

Waxaad la xidhiidhi kartaa:

Kooxda Guryeynta Qaxootiga ee Scottish Refugee Council

Ku hadal bilaash tilifoonkan si aad u hesho talo ama si aad ula ballanto talo ka shaqeeye:
0800 085 6087

Shelter Scotland

Ka wac tilifoonkan talo bilaasha: 0800 800 4444

Tallaabada Fiican ee Guryeynta

Wac lambarka si aad u hesho macluumaad ku saabsan adeegeeda: 0141 353 2220

Xarunta talada ee deegaanka

Wac GAIN Helpline 0808 801 1011 si aad u hesho tafaasiisa xarunta kuuga dhaw

Ka doono macluumaad dheeraada oo ku saabsan bixinta kirada websaaydka Shelter Scotland:

http://scotland.shelter.org.uk/getadvice/advice_topics/paying_for_a_home/paying_rent